

Somali



Xadugudubka Guriga

Marnaba okey ma ahan!



BIG KOORDINIERUNG

Bei häuslicher Gewalt · Hilfe für Frauen und ihre Kinder

Muxuu ka kooban yahay buug yarahaan?

Macluumaad muhiim ah oo ay tahay in la akhriyo

Hordhac: Waa maxay sababta buug yarahaan muhiim u yahay?

1. Waa maxay xadgudubka guriga?
2. Immisa nooc oo xadgudubka guriga ayaa jira?
3. socod wareega Xadgudubka
4. Carruurta iyo xadgudubka
5. Hababka aad uga baxsan kartid xadgudubka Yaa ku caawin kara?
Booliska.
Qadka 24-saac ee BIG.
Goobaha aad ka heli karto caawimo iyo tallo qof takhasuse ah.
Hoyga Dumarka.
Aqal Hoy laga dhigay.


6. Sidee ayay maxkamaduhu kuu caawin karaan.

Sharciga Illaalinta ee ka dhanka ah dulmiga.

Liisaska cinwaaanada

Qorid: Yaa ka shaqeeyay/sameeyay bug yarahaan?


Macluumaad muhiim ah oo ay tahay in la akhriyo:



Buug yarahaan waxa lagu qoray luqad fudud.
Inkastoo, ay wali ku jiraan ereyo adag.
Waxa jira ereyo lagu qoray far **muujisan**.
Ereyadan waxa lagu sharaxayaa bug yarahaan.

oo ku qoran luqad fudud

Waxaa meelo badan oo buuggan ah ku qornay "Falgeystaha".
kuwaasi inta badan waa rag:
Tusaale ahaan:
Sayga, daryeelaha, adeerka/abtiga,
awoowga, wiilka, jaarka/deriska ama saaxiibka.
"Falgeystayaashu" waxay sidoo kale noqon karaan dumar.
Tusaale ahaan:
Lamaanaha, hooyada ama gabar.



Tan ayaa ku jirta bug yarahaan.
Waxaan jeclaan laheyn inaan kuu sharaxno:
Xagee caawimo laga heli karaa magaalada Berlin?
Haddii aad la kulantid xadgudubka guriga.



Dhammaadka buug yarahaan waxaad ka heli kartaa **cinwaanada**.



Hordhac



Waxa xiriiro badan ku jira xadgudubyo. Ku dhawaad, dumarka ayaa markasta ah dhibanayaasha xadgudubka guriga. Ku dhawaad, ragga ayaa markasta ah Falgeystayaal. Tusaale ahaan, haddii saygu xaaskiisa wax ku dhufto. Ama haddii uu nin ku qeyliyo saaxiibadiis ama uu u hanjabo.



Xadgudubka wuxuu badanka ka dhacaa guriga. Aqalka ama guriga. Tani waa sababta noocan kamidka ah dulmiga loogu yeero **xadgudubka guriga**.

Xadgudubka guriga waa sharci daro.



Qofna looma ogola inuu wax ku dhufto dumaray. Qofna looma ogola inuu u hanjabo dumaray. Qofna looma ogola inuu dumaray ugu yeero magacyo xun-xun.


Tani waa sababta ay u jirto **Sharciga Illaalada ee Ka Dhanka ah Dulmiga**.

Sharciyadu waxa loogu talloagalay inay dhammaan dadka ka illaaliyaan xadgudubka.

Dumarka ayaa inta badan si joogto ah ula kulma xadgudubka.

Tani waa sababta uu sharcigani si gaar ah muhiim ugu yahay dumarka.

- Si aanay ula kulmin xadgudub.
- Si ay nafahooda uga difaaci karaan xadgudubka.



Waxaan rabnaa inaan dhammaan dumarka siino dhiirigelin.

Qofna looma ogola inuu wax kugu dhufto ama uu kuu hanjabo.

Waad is difaaci kartaa!



Ma tihid kali! Caawimo hel!



Dhammaan **cinwaanada** waxa laga heli karaa dhammaadka buug yarahaan.

Xadgudubka guriga marnaba maaha wax la aqbali karo!

1. Waa maxay xadgudubka guriga?



Xadgudubka guriga wuxuu ka dhex dhacaa dadka. Si fiican isu garanaya.

Tusaale ahaan:

- Sayga iyo xaaskiisa.
- Saaxiib iyo saaxiibadii.
- Ama qoyska dhexdiisa.



Ku dhawaad, dumarka ayaa markasta ah dhibanayaasha xadgudubka guriga. Ku dhawaad, ragga ayaa markasta ah dambiilayaasha.



Xadgudubka Guriga wuxuu badanka ka dhacaa guriga.

- Aqalka.
- Ama meelkale oo aanay cidi arki karin.

Tani waa sababta aanay dadku badanka u dareemin inay dhacayso.

Xadgudubka guriga waa:

- Marka uu saygu xaaskiiga wax ku dhufto.
 - Marka uu wiil weyni u hanjabo hooyadiis.
 - Marka uu aabuhu taabto gabadhiisa (inantiisa) weynaatay.
- Oo oonay iyaduna rabin.



Xadgudubka wuxuu ku dhici karaa dhammaan dumarka.

- Muhiim maaha haddii ay Jarmal tahay.
Ama haddii ay dumaraydu kasoo jeedo wadan kale.



- Muhiim maaha da'da ay jirto dumaraydu.




- Muhiim maaha haddii ay naafo tahay iyo haddii aanay ahaynba.



- Muhiim maaha waxa ay ka shaqeyso dumaraydu.
Ama haddii ay tahay xaas guriga joogta.



Dumarku badanka waxay dareemaan inay ceeboobaan.
Sababtoo ah ninka ayaa ula dhaqma si xun.
Sababtoo ah waa rabshadoole.
iyo sababtoo ah waxay u maleeyaan inay iyagu
khaladka leeyihiin.



Taasi waa sababta aanay dumar badani u codsan caawimo.
Oo aanay uga hadal xadgudubka guriga ka jira.



Waxaan rabnaa inaan ku siino dhiirigelin:

Uma baahnid inaad dareento qof ceebaysan.
Xadgudubka maaha wax aad adigu sameysay.
Qofka eeda lihi waa dembiilaha.

Fadlan caawimo raadso.

Carruurtaadana caawimo uraadi.



Ka hadal xadgudubka .
Xadgudubka maaha wax sir ah.
Xadgudubka maaha wax gaar ah.



Laga yaabaa inaad rabto kala tag (isfurid).
Oo aad Keli u noolaato.
Ama si Keli ah ula noolaato carruurtaada.



2. Immisa nooc oo xadgudubka guriga ah ayaa jira?

Waxa jira noocyo kala duwan oo xadgudubka guriga.



Xadgudub Jireed:

- Marka uu qof wax kugu dhufto.
- Marka uu qof ku riixo ama ku laago/laado.



- Marka uu qof cunaha ku qabto.
Ee Aad neefsan kari waydo

Xadgudub Nafsiyeed:


- Marka uu qof si xun Kuula dhaqmo.
- Marka qof uu ku caayo.



Marka uu qof ku cabsi-geliyo.

Ama ay kuugu **hanjabaan**:

- Inay carruurtaada kaa qaadanayaan.
- Ay waxyeeleynayaan.
- ay carruurta ka eryayaan.
Guriga. Ama xitaa ay ka saarayaan wadanka.





Faraxumeynta Galmada:

- Haddii uu qof ku taabto adigoon raali ka aheyn.
- Haddii qof kugu qasbo inaad daawato filimada xun-xun (qaawan).
- Kufsi:
Haddii uu qof kula yeesho galmo aanad rabin. Oo aad tiri "Maya".



Go'domin:

- Haddii uu qof kugu xiro gudaha guriga. Oo aan lagu ogaleyn inaad baxdo.
- Haddii aan lagu ogaleyn inaad sameyso wicitaanka teleefonka.
- Haddii aan lagu ogaleyn inaad la hadasho dadka kale.



Taasi sidoo kale waa xadgudub

- Haddii aan lagu ogaleyn inaad shaqada tagto.
- Haddii uu qof kaa qaado lacagtaada.
- Haddii aan lagu ogaleyn inaad gasho kooras luqadeed.



- Haddii aad jeceshay gabar. oo uu qoyskaagu mamnuuco.
- Haddii lagaa rabo guursato qof, aanad jecleyn.

Haddii aad rabto sidaa, waxaad u baahantay
inaad caawimo codsato.
Tani waa muhiim.
Waayo xadgudubka iskii iskuma joojiyo.
Badanka weysii xumaataa oo weysii xumaataa.




Laakiin wax baad ka qaban kartaa si aad u joojiiso.
Dadka kale wax uga sheeg (xadgudubka).

Tusaale ahaan:

- Saaxiib wax uga sheeg.
- Ama qof aad la shaqeyso.
- Ama la hadal cid kale, oo aad aaminto
- U tag booliska.
- ama **xarun tallo**



3. Wareega Xadgudubka



Xadgudubka iskii iskuma joojiyo.
Mararka qaar wey fiicnaataa wakhti dheer.
Kadib waxa laga yaabaa inaad is tiraahdo xadgudubka
wuu dhammaaday. Laakiin wali mushkiladu way jirtaa.
Kadibna badanka dib ayay u bilaabantaa.
Taasi waa sababta loogu yeero **meertada xadgudubka**.

Waxaa jiri karta tusaale ahaan:

- Lamaanahaaga ayaa kuu hanjabay.
Wuu ku garaacaa markale iyo markale.
Waxyaalahaasi waxay lamaanahaaga ka dhigaan
inuu dareemo xoog iyo fiicnaan.
Laakiin dhab ahantii waxaad dareentaa xumaan.
- Kadib waxa laga yaabaa in lamaanahaagu uu
ka xumaado.
Wuu ku raaligelinayaa.
Wuxuu kuu balan qaadayaa inaanuu weligii
mardanbe wax kugu dhufanayn.
Wuxuu ku siinaayaa hadiyado.
- Kadib waxaad markale dareemaysaa fiicnaansho.
Adiga iyo lamaanahaagu waxaad markale bilowdeen
inaad yeelataan xiriir fiican.
Laga yaabaa inaad markale jeclaata isaga.
- Laakiin hadda waxay dib u bilaabantay markale.
Wali mushkiladu way jirtaa.
Lamaanahaagu markale ayuu kuu hanjabay.
- Markale ayaad cabsi dareentay.
Xadgudubka wuu kasii iyo kasii xumaan karaa.



4. Bukaanka Carruurta

Gaar ahaan waxay u darantahay carruurta:
Haddii ay la kulmaan xadgudub!



Carruurta qaar ayaa meel kale u guura
wadan kale.

Way qaxaan.
Waayo dagaal ayaa ka jira wadankaas.



Waxay u cabsanayeen nafahooda.
Ama waxay arkeen waxyaabo aad u daran intay wadada
kusoo jireen.

Carruurta sidoo kale way dareemaan haddii uu xadgudub
ka jiro gurigooda. Way arkaan, maqlaan oo ay dareemaan
xadgudubka.



Carruurta badanka waa dhibanayaasha xadgudubka.
Waa la garaacaa.

Ama waa loo hanjabaa oo wey baqaan.
Mararka qaar, carruurta waxay la kulmaan xadgudubka
galmada.





Dhab ahaantii xadgudubka aad buu ugu daranyahay carruurta.


Waxay ka dhigtaa inay dareemaan cabsi badan.

- Waxa laga yaabaa inay ku riyoodaan riyoooyin xun (cabsi leh) ama ay awoodi waayaan inay seexdaan.
- Waxa laga yaabaa inay habeenkii ku kaadiyaan (kaadiyaan) sariirtooda.
- Waxay dareemaan baqdin.
- Ama carruurta way isbadelaan.



Carruurta qaar waxay noqdaan kuwo aamusan oo Cabsi qaba. Carruurta qaar way caroodaan oo waxay wax ku dhuftaan carruurta kale.

- Waxa laga yaabaa in aanay carruurta ciyaarin mardanbe.
- Qaar kamidina si fiican uma baran karaan wixii ka danbeeya.



Carruurta waa in laga illaaliyaa xadgudubka! Dhammaan carruurta waa inay awoodaan inay koraan iyagoo bilaa xadgudub ah. Waa xuquuqdooda.



Waxa jirta taageero gaar ah oo la heli karo oo loogu tallogalay carruurta. Fadlan caawimo u codso carruurtaada. Tusaale ahaan waxaad ka codsan kartaa booliska. Ama waxaad tagi kartaa **xarun tallo**. Ama **xarunta magan-galka dumarka**.

Waxaad ka heli kartaa **cinwaanada** dhabarka buugyarahaan.

5. Hababka aad uga baxsan kartid xadgudubka Yaa ku caawin kara?




Boolisku way ku caawin karaan.

Sidee ayaa ula xiriiri kartaa booliska?

Haddii ay kugu dhacdo xadgudub, waxaad wici kartaa booliska.

- Waxaad teleefonka ka wici kartaa lamabarka xaaladaha degdega ah **110**.
- Waxaad tagi kartaa xarunta booliska.
Markasta qof ku caawiya ayaad ka helaysaa booliska.
Wakhti kasta.
Maalin iyo Habeen.
Waxaad Dacwad ka xareyn kartaa booliska.
Waxaad sidoo kale fakis u diri kartaa lambarka 110.



Maxay sameynayaan boolisku?

Haddii aad la kulanto xadgudub waxaad wici kartaa booliska.
Kadib booliska ayaa kuu imanaya wayna ku caawinayaan.
Boolisku waxay ku weydiinayaan: Sida ay wax u dhaceen?



Kadib boolisku waxay xareynayaan eedeeyn dambiyeed.
Boolisku waxay hubinayaan: Ma khatar ayaad ku sugantay?
Demiiluhu wali muu kuu hanjabayaa?



Kadib boolisku waxay aqalka ka ceyrin/eryayaan demiilaha.
Amba kaamka.
Looma ogolaanayo inuu soo noqdo ilaa laba todobaad.
Tan waxa loogu talagalay illaaladaada.
Tani waxay ku siineysaa wakhti laba todobaad ah.



Waxaad qaadan kartaa wakhti kugu filan si aad uga fekirto:
Waxa xiga ee aad rabto inaad sameyso.

Boolisku waxay kuu sharaxayaan:

- Waxyaabaha aad immika sameyn karto.
- Xuquuqaha aad leedahay.
- Waxaad tagi kartaa xarumahan si aad u hesho caawimo ama tallo.



Boolisku sidoo kale waxay ku geyn karaan goob ammaan ah.

Tusaale ahaan, **xarunta magan-galka dumarka.**

Haddii ay taasi tahay waxa aad rabto.

Iyo haddii aad xarunta Hoyga dumarka ku dareemeysid ammaan

Waxa jiro goobo badan oo aad caawimo ka heli karto.
Teleefonka.

Xarun **tallo.**

Xarunta **magan-galka dumar.**

Guryaha xannaanada.

Cinwaanku waa mid sir ah.

Noocan kamidka aqalada waxa la dhahaa **Hoyga magangalka.**



Waxaad u sheegi kartaa cid kasta oo halkaa joogta:

In arrinkani kugu dhacay.

Shaqaalaha looma ogola inay cid kale arrinka u sheegaan.

Tan waxa loogu yeeraa **Xog-qarinta Shaqada.**

Si aad caawimo teleefonka ah ku hesho
Waxaad wici kartaa khadka 24-saac ee BIG.



Waa maxay khadka 24-saac ee BIG?

BIG waxa loo soo gaabiyay: **Hindisaha Xadgudubka Ka Dhanka ah Dumarka.**

Khadka 24-saac waa erey kale oo loogu yeero: Tallada teleefonka.

Waad wici kartaa haddii aad u baahantay caawimo.



Xitaa haddii aanad ku hadlin af Jarmal.

Waxa jooga turjumaan ku caawin kara.

Turjumaanku wuxuu turjumayaa:

Waxa aad tiraahdo.

Iyo waxa ay dadka kale kugu iraaahdaan.

Waxaad la xiriiri kartaa khadka 24-saac ee BIG **maalin kasta.**


Dhammaan wakhtiyada.

Dhammaan habeenkii iyo maalintii.

- Waad wici kartaa.
- Ama waxaad u diri kartaa iimayl.
- Sidoo kale waxaad u diri kartaa fakis.

Uma baahnid inaad magacaaga sheegto.

Haddii aanad rabin.





Goorma ayuu khadka 24-saac ee BIG ku caawin karaa?

- Haddii aanad caadi u garaneyn waxa ay tahay inaad sameyso.
- Haddii aanad wali garaneyn:
Tani ma xadgudubaa?
- Haddii aanad wali garaneyn:
Xagee ayaan caawimo ka heli karaa?

- Haddii aad boos uga baahantay **xarunta Hoyga dumarka**
Hoyga **magangelyada**.



- Haddii aad rabto inaad feyl Xareyso maxkamada.
Tusaale ahaan:
Si aan lamaanahaaga loogu ogolaan inuu kuusoo dhawaado.
Si aan lamaanahaaga loogu ogolaan inuu aqalkaaga imaado. Ama gurigaaga.



Waa maxay tallaabooyinka xigaa?

Shaqaalaha ayaa tallo ku siin doona.
Waxay ku siinayaan tallooyin iyo macluumaad.



Qof shaqaale ah ayaa sidoo kale kuu iman kara si uu kuugula kulmo. Goob ammaan ah.

Halkaas ayaad labadiinuba ku go'aansaneysaan:

- Caawimada loo baahanyay?
- Waxa xiga ee dhacaya?

Xarumaha takhasuska leh ee latalinta iyo xarumaha kala dhexgalka.
Kuwani waa xarumo loogu talagalay dumarka la kulmay xadgudubka guriga.



Cinwaanada waxa laga heli karaa buugyarahaan.

Goorma ayay xarun tallo ku caawin kartaa?



- Haddii aad rabto inaad la hadasho oo aad tiraahdo:
Arrinkan ayaa igu dhacay.
- Haddii aad la kulanto xadgudub.
Oo aanad wali garaneyn waxa aad sameyn karto.
- Haddii uu boolisku kuusoo booqday arrin ku saabsan xadgudub.
Laga yaabaa inaad xareysay Dacwad.



- Waxa laga yaabaa in boolisku Falgeystaha ceyriyeen/eryeen.
- Waxa laga yaabaa inaad kala tagteen lamaanahaaga.
Waayo wuu kuu hanjabay ama waxbuu kugu dhuftay.
Laakiin wali kaamuu harin.
Wali wuu ku dhibaanteynayaa.



- Haddii aad u baahantay tallo iyo caawimo.
Xitaa haddii ay tahay wakhti dheer.




- Laga yaabaa inaad garanayso gabadh lagu xadgudbay.
Oo aad rabto inaad caawiso gabadhaas.



- Xarunta talladu waxay sidoo kale caawiyaan Dumarka wadanada kale kasoo jeeda: Laga yaabaa inaad xadgudubka kala kulantay guriga. Ama huteelka. Laakiin laga yaabaa inaad ka cabsanayso inaad ka tagto lamaanahagaa. Waxaad ka cabsanaysaa: in laga yaabo inaad kusii noolaan Jarmalka.



Tani waa mushkiladaha uu qofka shaqaalaha ah ee jooga xarunta talladu uu kaa caawin karo. Iyo sidoo kale waxa jirta tallo sharci.




Sidee ayaad ula xiriiri kartaa xarumaahaas tallada?

- Waxaad xarun tallo ka wici kartaa teleefonka. Ama waxaad u diri kartaa fariin.
- Ama waxaad u diri kartaa iimayl.
- Sidoo kale waxaad u diri kartaa fakis.



Uma baahnid inaad magacaaga sheegto. Haddii aanad rabin.



Waa maxay tallaabooyinka xigaa?

Waxa lagu siinayaa ballan aad wada hadal oo ka dhacaysa xarunta tallada. Haddii aad rabto, waxaad soo kaxeysan kartaa qof ku taageera.

Qofka shaqaalaha ah ayaa kadib kaagala hadlaya:
Wax ku saabsan su'aalaha iyo mushkiladaha:



Haddii aanad ku hadlin af Jarmal, turjumaan ayaa isna goobta joogaya.
Turjumaanku wuxuu turjumayaa:
Waxa aad tiraahdo.
Iyo waxa ay dadka kale kugu iraaqdaan.


Qofka shaqaalaha ah wuu ku taageerayaa.
Tusaale ahaan, xitaa markaad maxkamada joogtid.
Ama kullamada rasmiga ah.
Haddii aad rabto in lagaa caawiyo hawlahaas.



Waxaad sidoo kale tallo sharci ka heli kartaa xarunta tallada.

Tusaale ahaan, tallo ku saabsan su'aalaha:

- Waa maxay xuquuqahaagu?
- Sidee ayaad u xareyn kartaa Dacwad boolis oo ku saabsan Eedayshanaha?
- Miyaad u baahantay qareen? Wax ka garanaya sharciga.
- Maxaa xiga oo ka dhicaya maxkamada?
- Yaa heli doona Masuuliyada carruurta?
- Waa maxay xaalada xuquuqda deganaanshahu?
Haddii aad kasoo jeedo wadan kale.



Haddii aad u baahantay illaalo, qofka shaqaalaha ah ayaa sidoo kale kaa caawin kara.
Waxay kaa caawin kartaa sidii aad u heli lahayd xarunta magan-galka dumarka.

Sidoo kale waxa jirta taageero loogu talagalay carruurta oo laga heli karo xarunta tallada.
Sidoo kale carruurta ayaa halkan isha lagu hayn karaa.
Si aad si werwer la'aan ah aad u hadli kartid.





Xarunta magan-galka dumarka

Waa maxay magan-galka dumarku?

Haddii lamaanahaagu oo wax kugu dhufto ama uu kuu hanjabo, waxaad tagi kartaa xarunta magan-galka dumarka. Ammaan ayaad ku ahaaneysaa magan-galka haweenka. Cinwaanku waa mid sir ah.



Kaliya dumar ayaa ka shaqeeya xarunta magan-galka dumarka. Waxaad iman kartaa oo joogi kartaa xarunta magan-galka dumarka wakhti kasta. Xitaa haddii ay tahay bartamaha habeenkii.



Haddii aad kasoo jeedo wadan kale. Wali waad iman kartaa si aad u joogtid xarunta magan-galka haweenka.



Xarunta magan-galka dumarka ee magaalada Berlin, ma bixinaysid kiro.

Waa lagu ogolyay inaad ku noolaato xarunta magan-galka dumarka ilaa iyo inta, ay laga maarmaanka tahay.



Waxaad sidoo kale carruurta usoo qaadan kartaa xarunta magan-galka dumarka.

Waxa jirta hal ka reebis:

Haddii aad leedahay wiil ka weyn 12 jir.

Haddii aad heysato, uma soo kaxeyn kartid xarunta magan-galka dumarka.



Waa inaad adigu iskaa wax isku siisaa marka aad joogtida xarunta magan-galka dumarka:

- Adiga ayaa wax isku karinaya.
- Adiga ayaa wax mayranaya.
- Adiga ayaa daryeelaya carruurtaada.

Sidee ayaad ula xiriiri kartaa xarunta magan-galka dumarka?

Waxaad xarunta magan-galka dumarka ka wici kartaa teleefonka. Adigoo taas sameynaya, waxaad u ogolaan kartaa inay ku caawiyaan. Qofka shaqaalaha ah ayaa kuu sheegayo goob aad ku kulantaan. Xagaas ayaad tageysaa. Qofka shaqaalaha ah ayaana kaasoo qaadaya goobta kulanka. Ama gabadh kale oo ka socota xarunta magan-galka dumarka ayaa Kulmaysa. Kadib, labadiinuba waxaad si wadajir ah u tageysaan magan-galka haweenka.

Waxaad ka heli kartaa **lambarada teleefonka** dhammaadka buugyarahaan.



Waa maxay tallaabooyinka xigaa?

Ammaan ayaad ku ahaaneysaa magan-galka haweenka. Waxa lagu siinayaa qol adiga kuu gaar ah. Waad isdejin/nafisi kartaa.



Waxaad ka fekeri kartaa waxa xiga ee aad rabto inaad sameyso.

- Ma waxaad rabtaa inaad u guurto aqal adiga kuu gaar ah?
- Ma waxaan jeclaan lahayd inaad la noolaato qaraabada ama asxaabta?
- Ma waxaad rabtaa inuu ninkaagu ku furo?



Shaqalaha xarunta maga-galka haweenku waxay kaa caawineysaa wixii su'aal ah ee aad qabto.

Waxay kusiinayaan tallooyin iyo cinwaano.

Xagee kale ayay dumarka iyo carruurta caawimo ka heli karaan?



Waxa jooga turjumaano.

Loogu talogalay dumarka aan ku hadal af Jarmal badan.

Sidoo kale waxa jooga turjumaano loogu talogalay dumarka dhagoolka ah. ee isticmaala luqada faraha.




Sidoo kale shaqaaluhu wayku taageeri karaan.
Tusaale ahaan, waxay kuu raaci kartaa maxkamada ama xafiisyada dawlada.
Ama xarumaha tallada.



1 mar todobaad kasta, Qareemad ayaa soo booqanaysa xarunta magan-galka dumarka. Qareenku wuu kula talin karaa. Ma jirto lacag lagaa qaadayaa.

Haddii aad rabto inaad tagto ballan. carruurtaada waa laguusii illaalin karaa.



Waa inaad waraaqahan usii qaadataa xarunta magan-galka dumarka:

- Kaar aqoonsi
- Kaararka aqoonsiga ee carruurta
- Shahaadooyinka dhalashada ee carruurtaada
- caddeynta dakhliga:
Taas oo sheegaysa: Intee in le'eg oo lacag ah ayaad heshaa/ayaa kusoo gasha.
- Dumarka aan kasoo jeedin Jarmalka: Boosaboor.
Waraaqo shaqo oo sheegaya:
Intee in le'eg ayaa lagu ogolyay inaad Jarmalka joogtid.
- Kaarka ceymiska caafimaadka ama ceymiska caafimaadka.
- Warqada ogolaanshaha qofka naafada ah.
- Dokumentiyada bangiga.
- Cinwaanada dhakhaatiirta muhiimka ah.




Waa inaad sidoo kale soo qaadataa:

- Dawooyinka.
- Dharka.
- Agabka dugsiga ee carruurtaada
- Agabka ay carruurtaadu ku ciyaarto

Aqalka loo magan galo

Waa maxay aqalka loo magan galo?

Waa aqal, aad si kali ah kulan noolaan karto carruurtaada. Ama aad kula noolaan karto dumar iyo carruur kale Aqal la wadaago. Waxaad Xataa ka heleysaa qol aad adigu gaar u leedahay. Cinwaanku waa mid sir ah.



Waa inaad bixisaa kirada aqalka.

Haddii aanad heysan wax lacag ah:
Codso caawimo.



Shaqaalaha bulshada ayaa kaa caawin kara codsashada.

Ama haddii aad heysato su'aalo ama mushkilado. Shaqaalaha bulshadu sidoo kale waxay kuu raaci kartaa goobo. Tusaale ahaan, waxay kuu raaci kartaa maxkamada ama xafiisyada dawlada. Ama xarumaha tallada.



Qaar kamida aqalada hoyga laga dhigay, waxa laga heli karaa taageerada carruurta.

Qaar kamida aqalada hoyga laga dhigay


Waxaa u kaxeysan kartaa wiilasha waaweyn.

Xitaa haddii ay wiilashashadu ka waaweyn yihiin 14 sanno jir.



Goorma ayaa awoodaa inaad u gurto aqal hoy laga dhigay?

- Haddii aanad joogi karin aqalkaaga.
- Haddii aanad u guuri karin xarunta magan-galka dumarka.




Sidee ayaa loo helaa aqalka hoyga laga dhigay?

- Waxaad wici kartaa xafiiska aqalka hoyga laga dhigay.
- Ama waxaad u diri kartaa fariin.
- Ama waxaad u diri kartaa iimayl.
- Sidoo kale waxaad u diri kartaa fakis.

Lambarada teleefonka waxa laga heli karaa dhammaadka buugyarahaan.

Waa maxay tallaabooyinka xigaa?



Waxaad ballan ka sameyn kartaa xafiiska.
Waxaad sidoo kale halkaa ka heli kartaa macluumaad ku saabsan aqalka hoyga laga dhigay.
Waxaad la hadli kartaa xubin kamida shaqaalaha.
Waxaad u sharixi kartaa waxa dhacay.
Iyo waxaad weydiin kartaa su'aalo.



Xafiiska dhexdiisa xitaa waxaad mararka qaar ku arki kartaa sawirada
Aqalka loo magan galo.
Kadib waxaad ka baaraandageysaa.
Haddii aad rabto inaad u gurto.
Haddii aad u gurto,
shaqaaluhu waxay kaa taageerayaan wixii su'aalo iyo mushkilado ah ee aad heysato.

6. Sidee ayay maxkamaduhu kuu caawin karaan?




Waxa jira Sharciga Illaalinta ee Ka Dhanka ah Dulmiga.
Waxaad tagi kartaa maxkamada qoyska si aad u sameyso codsiyo badan.

Si aad uga ammaan hesho Falgeystaha.
Si uu xadgudubka u istaago.



Waxaad tusaale ahaan sameyn kartaa codsiyada:

- Inaad awoodo inaad si kali ah ugu noolaato aqalkaaga lawadaago dabaqa.
- In aanuu dembiiluhu soo geli karin aqalkaaga.
- In aan dembiilaha loo ogolaan inuu kaa soo ag dhawaado.
- Inaan dembiilaha wixii immika ka danbeeya loo ogolaan inuu ku dhibaateeyo.
- Inaan wixii immika ka danbeeya loo ogolaan inuu ku dabagalo.



Kadib dembiiluhu kuma soo wici karo wixii immika ka danbeeya.
Sidoo kale looma ogola inuu kusoo diro fariin ama iimayl.
Ama: Dembiiluhu waa inuu kaa fogaadaa 50 mitir.
Looma ogola inuu kuusoo dhawaado.
Looma ogola inuu joogo qolka aad adigu joogto.




Si kastaba ha ahaatee, haddii uu dembiiluhu uu sidaas sameeyo,
waxaad wici kartaa booliska: **110**
Booliska ayaa ku ilaalin kara.
Waxay ceyrinayaan/eryayaan dembiilaha.
Waxa lagu soo oogi karaa dembi la xiriira arrinkan.



**Boolisku waxay
Kaa caawin karaan!**

Boolisku waxay soo saarayaan eedeyn dembi.
Waa inaad eedeynta keentaa maxkamada qoyska.



Waxa jira sharciyo kale oo badan.
Tusaale ahaan, **xeerka dembiiyada.**
Taas oo sheegaysa:
Kaas oo sharaxa ciqaabaha dembiyo kala duwan.
Iyo ciqaabta la siinayo dembiilaha.



Waxaad booliska ka xareyn kartaa eedeeyn dembiile.
Kadib booliska ayaa baarayo.
Waxa dhacay?
Yaa sameeyay wax?
Qareen ayaa ku caawin kara.

Booliska ayaa raadinayo caddeyn.
Kadib dembiilaha waxa dembi kusoo oogi karta.
maxkamada dembiyada.
Kadib waxaad tahay markhaati.
Taa macnaheedu waa: Inaad maxkamada dembiyada wax kasta u sheegto.

oo waxaad heleysaa taageero ka sii badan.
Taa macnaheedu waa: **Hanaanka taageerada bulshada iyo nafsiga.**
Taasi waa saaxiib.
Kuusoo raaca booliska.
Haddii ay taasi tahay waxa aad rabto.
Haddii aad rabto inaad xareyso eedeeyn dembi.



Waxay sidoo kale kuu sharixaysaa:
Waxa aad marka dambe ku sameyneysid maxkamada.
Waa in aanad keligaa tagin maxkamada.
Saaxiibadaa ayaa kuu Raacaysa.
Way kula joogaysaa dhammaan wakhtiga.
Marka aad u sharaxdo waxa dhacay.

(Tegida) waadhka Illaalada ee Ka Dhanka ah Dulmiga.

Taasi waa meesha caafimaadkaaga lagu baarayo:

Haddii aad ahayd dhibane xadgudub.

Waxaad iman kartaa halkan haddii:

- Dembiiluhu ku waxyeeleeyay.
- Dembiiluhu ku dhaawacay.
- Dembiiluhu cunaha ku qabtay.
- Dembiiluhu kugu qasbay inaad la galmooto.
- Ama haddii ay kugu yaalaan calaamado.

Ama nabaro.

Haddii kuwaas mid kamid ah ay khuseeyaan waxaad tagi kartaa waadhka illaalada ee ka dhanka ah dulmiga.

Marka hore wac.

Oo balan samee.

Lambarada teleefonka waxa laga heli karaa dhammaadka buugyarahaan.

Dhakhtar ayaa ku baarayo.

Waxay sawireysaa dhammaan nabaradaada.

Waxay qoreysaa dhammaan dhaawacyadadaada.

Kadib waxaad go'aansan kartaa:

Haddii aad rabto inaad isticmaasho qoraalada.



Kadib waxaad go'aansan kartaa:

Haddii aad rabto inaad isticmaasho qoraalada.

Inaad booliska u tagto tusaale ahaan.

Haddii aad rabto inaad Dacweyso dembiilaha.

Ama aad rabto inaad tagto maxkamadaha.



Fadlan la soco:

Haddii uu dhiig kaa socdo. Ama ay wax jabeen.

U tag dhakhtarka.




Ama cusbitaalka. Ama tag qolka xaaladaha degdega ah.






Cinwaano muhiim ah.

Haddii aad rabto in lagaa caawiyo xadgudubka guriga.
Haddii aad rabto tallo iyo macluumaad ku saabsan
xadgudubka guriga.

Booliska

-  Teleefon: 110
-  Lambarka fakiska
ee xaaladaha degdega ah: 110
-  barta intarneetka: www.polizei.berlin.de





Adeega Dab-demiska

-  Teleefon: 112
-  Lambarka fakiska
ee xaaladaha degdega ah: 112
-  barta intarneetka: www.berliner-feuerwehr.de

Mashruucyada Dumarka








Khadka 24-saac ee BIG

-  Teleefon: 0 30 – 6 11 03 00
-  Fakis: 0 30 – 61 07 45 65
-  iimayl: info@big-hotline.de
-  barta intarneetka: www.big-hotline.de

Xarumaha takhususka leh ee latalinta iyo Xarumaha Tallada ee xadgudubka guriga

Frauentreffpunkt (Neukölln) - Neukölln goobta kulanka dumarka





	Teleefon:	0 30 – 6 22 22 60
	Fakis:	0 30 – 62 70 55 18
	fariin	01 51 – 56 74 09 45
	iimayl:	frauentreffpunkt@skf-berlin.de
	barta intarneetka:	www.offenesozialarbeit-sfk.de



Adeegyada loogu talagalay dumarka naafada ah:

Mid kamid ah shaqaalahayaga ayaa isticmaali kara **in kamida** luqada faraha. Waxaan u heynaa wado ay maraan kuwa isticmaala gaari curyaanku. Adeegyada carruurta: Illaalin, caawin iyo taageero

Frauenraum (Mitte) – Qolka Dumarka (Berlin Mitte)

	Teleefon:	0 30 – 4 48 45 28
	Fakis:	0 30 – 4 48 45 27
	iimayl:	frauenraum@arcor.de
	barta intarneetka:	www.frauenraum.de

Frauen-Beratung Bora (Weißensee) - Bora Tallada Dumarka (Berlin Weißensee)

	Teleefon:	0 30 – 9 27 47 07
	Fakis:	0 30 – 92 37 52 66
	iimayl:	beratungsstelle@frauenprojekte-bora.de
	barta intarneetka:	www.frauenprojekte-bora.de
	Tallo intarneetka laga heli karo (onleenn ah):	https://bora.beranet.info/

Frauenberatung Tara (Schöneberg) – Tallada Dumarka ee Tara (Berlin-Schöneberg)



Teleefon: 030 – 78 71 83 40



Lambarka fakiska ee xaaladaha degdega ah:
030 – 78 71 83 49



e-mail: frauenberatung.tara@gmx.de



barta intarneetka: www.frauenberatung-tara.de

Xarunta ku takhasusay tallooyinka dhaqanada kala duwan iyo xarunta kala dhexgalka (Berlin-Zehlendorf)

Tallo iyo taageero luqado badan ah



Teleefon: 030 – 80 19 59 80



Fakis: 030 – 80 19 59 82







iimayl: info@interkulturelle-initiative.de







barta intarneetka: www.interkulturelle-initiative.de

Hoyga dumarka




Frauen-Haus des Caritasverbandes – Xarunta magan-galka dumarka ee kooxda Caritas

	Teleefon:	030 – 8 51 10 18
	Fakis:	030 – 8 51 30 10
	iimayl:	frauenhaus@caritas-berlin.de
	barta intarneetka:	www.caritas-berlin.de





Xarunta magan-galka dumarka ee Hestia

	Teleefon:	030 – 5 59 35 31
	Fakis:	030 – 55 48 96 99
	iimayl:	pub@hestia-fh.de
	barta intarneetka:	www.hestia-fh.de

2. Autonomes Frauen-Haus – Xarunta Magan-galka Dumarka Miyirka La'

	Teleefon:	030 – 37 49 06 22
	Fakis:	030 – 37 49 06 20
	barta intarneetka:	frauenselbsthilfe-berlin@t-online.de





Frauen-Haus Cocon – Xarunta magan-galka dumarka ee Cocon

	Teleefon:	030 – 91 61 18 36
	Fakis:	030 – 91 61 18 37
	iimayl:	info@frauenhaus-cocon.de
	barta intarneetka:	frauenhaus-cocon.berlin.de

Frauen-Haus Bora - Xarunta magan-galka dumarka ee Bora






-  Teleefon: 030 – 98 64 332
-  Fakis: 030 – 98 65 320
-  iimayl: frauenhaus@frauenprojekte-bora.de
-  intarneetka: www.frauenprojekte-bora.de

Interkulturelles Frauen-Haus - Xarunta magan-galka dumarka ee kala dhaqanka duwan.

-  Teleefon: 030 – 80 10 80 50
-  Lambarka fakiska ee xaaladaha degdega ah:
030 – 80 10 80 55
-  iimayl: info@interkulturelle-initiative.de
-  barta intarneetka: www.interkulturelle-initiative.de

Aqalada hoyga laga dhigay

Frauenort Augusta - Goobta magan-galka dumarka ee Augusta

-  Teleefon: 030 – 28 59 89 77
-  Fakis: 030 – 46 60 02 18
-  fariimaha loogu talagalay
dadka dhagoolka ah 0160 – 66 63 77 8
-  iimayl: frauenort-augusta@zukunftbauen.de
-  barta intarneetka: www.frauen-zuflucht.de







Adeegyada loogu talagalay dumarka naafada ah:

Shaqaaluhu waxay isticmaali karaan **in kamida** luqada faraha.

Flotte Lotte

-  Teleefon: 030 – 4 16 70 11
-  Fakis: 030 – 40 71 35 92
-  iimayl: info@flotte-lotte-berlin.de
-  barta intarneetka: www.flotte-lotte-berlin.de

Frauenzimmer e. V. –Qolka Dumarka ee bulshada diiwaanka geshan

-  Teleefon: 030 – 78 75 015
-  Fakis: 030 – 78 75 016
-  iimayl: frauenzimmer-zuflucht@web.de
-  barta intarneetka: www.frauenzimmer-ev.de

Adeegyada loogu talagalay dumarka naafada ah:



Mid kamida aqalada hoyga laga dhigay ayuu gaari curyaanku geli karaa.




Dumarka indhoolka ah waxay soo kaxeysan karaan eygooda hagida.





Hestia-Zufluchts-Wohnunge – Aqalada Hoyga laga dhigay ee Hestia

 Teleefon: 030 – 4 40 60 58
 Fakis: 030 – 44 05 50 40
 iimayl: zuwo@hestia-ev.de
 barta intarneetka: www.hestia-ev.de






Matilde e. V.

 Teleefon: 030 – 56 40 02 29
 Fakis: 030 – 5 64 75 62
 iimayl: frauenzentrum.Mathilde@gmx.de
 barta intarneetka: www.frauenzentrum-matilde.de

offensiv '91 e. V. - Bulshada gafka diiwaanka geshan ee '91

 Teleefon: 030 – 63 22 38 45
 Fakis: 030 – 6 31 60 01
 iimayl: info@frauenhaus-cocon.de
 Barta intarneetka: frauenhaus-cocon.berlin.de

Paula Panke

 Teleefon: 030 – 4 85 47 02 or
 030 – 4 85 47 01
 Fakis: 030 – 48 09 98 47
 fariimaha loogu talagalay
 Loogu talagalay dadka dhagoolka ah 0163 – 9 60 63 82
 iimayl: zufluchtswohnung@paula-panke.de
 barta intarneetka: www.paula-panke.de



Adeegyada loogu talagalay dumarka naafada ah:

Shaqaaluhu waxay isticmaali karaan **in kamida** luqada faraha.

ZUFF e. V.

 Teleefon: 030 – 6 94 60 67
 Fakis: 030 – 69 81 83 58
 iimayl: mail@zufluchtswohnungen.de
 barta intarneetka: www.zufluchtswohnungen.de


Xarumaha tallada iyo mashruucyada guryeynta ee kale

Mashruuca guryeynta dadka kala dhaqanka duwan

 Teleefon: 030 – 80 10 80 10
 Fakis: 030 – 80 10 80 15
 iimayl: info@interkulturelle-initiative.de
 barta intarneetka: www.interkulturelle-initiative.de

Adeega xaaladaha degdega ah ee gabdhaha

Krisen-Wohnung von Wildwasser e. V. –aqalka dhibaatooyinka ee Wildwasser e. V.

 Cinwaanka: Bornemannstraße 12
13357 Berlin
 Teleefon: 030 – 21 00 39 90
 Fakis: 030 – 21 00 39 91
 iimayl: maedchennotdienst@wildwasser-berlin.de
 barta intarneetka: www.wildwasser-berlin.de

Xarumaha tallada ee xadgudubka galmada

Is caawinta dumarka iyo tallada

	Cinwaanka:	Friesenstraße 6 10965 Berlin
	Teleefon:	030 – 69 39 192
	Fakis:	030 – 69 38 852
	iimayl:	selbsthilfe@wildwasser-berlin.de
	barta intarneetka:	www.wildwasser-berlin.de


Xarunta Tallada Gabdhaha ee Belin-Mitte


	Cinwaanka:	Dircksenstraße 47 10178 Berlin
	Teleefon:	030 – 28 24 427
	Fakis:	030 – 28 48 49 15
	iimayl:	dircksen@wildwasser-berlin.de
	barta intarneetka:	www.wildwasser-berlin.de


Kooxda deganaanshaha hablaha kala dhaqanka duwan ee Donya


	Cinwaanka:	Wriezener Straße 10/11 13359 Berlin
	Teleefon:	030 – 48 62 82 11
	Fakis:	030 – 48 62 82 12
	iimayl:	donya@wildwasser-berlin.de
	barta intarneetka:	www.wildwasser-berlin.de


KIZ (Ilmo Bartanka Ku Jira)

 Cinwaanka: Maxstraße 3a
13347 Berlin

 Teleefon: 030 – 2 82 80 77


 Fakis: 030 – 2 82 93 90


 iimayl: kiz@ejf.de


 barta intarneetka: www.ejf.de


Lara


Takhasusaha qeybta xadgudubka galmada ee ka dhanka ah dumarka*

 Cinwaanka: Fuggerstraße 19
10777 Berlin

 Teleefon: 030 – 2 16 88 88

 Fakis: 030 – 2 16 80 61

 iimayl: beratung@lara-berlin.de

 barta intarneetka: www.lara-berlin.de

Mac-macaanlaha habeenkii ee dumarka

qeyb kamid ah Wildwasser e. V.

 Cinwaanka: Mareschstraße 14
12055 Berlin

 Teleefon: 030 – 61 62 09 70





 iimayl: frauennachtcafe@wildwasser-berlin.de

 barta intarneetka: www.wildwasser-berlin.de

Waxaad halkan caawimo ka heli kartaa wakhtiga habeenkii.

Xitaa (waxa jira) xarumo tallo oo kale

Netzwerk behinderter Frauen Berlin e. V. – Shabakada Dumarka Naafada ah ee Berlin e. V.

-  Cinwaanka: Leinestraße 51
12049 Berlin
-  Teleefon: 030 – 61 70 91 67 or
030 – 61 70 91 68
-  Fakis: 030 – 67 96 83 20
-  iimayl: info@netzwerk-behinderter-frauen-berlin.de
-  Barta intarneetka: www.netzwerk-behinderter-frauen.de

Latalinta khaniisadaha



-  Cinwaanka: Kulmer Str. 20
10783 Berlin
-  Teleefon: 030 – 21 52 000
-  Fakis: 030 – 21 91 70 09
-  iimayl: info@lesbenberatung-berlin.de
-  barta intarneetka: www.lesbenberatung-berlin.de

Xarunta Caafimaadka ee Bukaana Socodka Xagudubka Guriga ee Charité


-  Cinwaanka: Birkenstraße 62, Hs. N
10559 Berlin
-  Teleefon: 030 – 450 570 270
-  Fakis: 030 – 450 7 570 270
-  iimayl: gewaltschutz-ambulanz@charite.de
-  barta intarneetka: www.gewaltschutz-ambulanz.charite.de

Adeegyada Xaaladaha Degdega ah ee Illaalinta Carruurta ee Berlin

Khadka 24-saac ee Illaalinta Carruurta

 Teleefon: 030 – 61 00 66
 barta intarneetka: www.berliner-notdienst-kinderschutz.de


Adeegyada Xaaladaha Degdega ah ee Carruurta

 Cinwaanka: Gitschiner Straße 48/49
10969 Berlin
 Teleefon: 030 – 61 00 61
 barta intarneetka: www.kindernotdienst.de

Adeega xaaladaha degdega ah ee gabdhaha

 Cinwaanka: Mindener Straße 14
10589 Berlin
 Teleefon: 030 – 61 00 63
 barta intarneetka: www.berliner-notdienst-kinderschutz.de

Adeegyada Xaaladaha Degdega ah ee Dadka Yaryar

 Cinwaanka: Mindener Straße 14
^
10589 Berlin
 Teleefon: 030 – 61 00 62
 barta intarneetka: www.berliner-notdienst-kinderschutz.de



Macluumaadka daabacaada.

Yaa sameeyay buugyaraan? Yaa ka shaqeyay buugyaraan?

Kooxda shaqeysa ee "Tallaabooyinka Badbaadinta dumarka naafada ah" ayaa sameeyay buugyaraan.

Hay'adahan ayaa sidoo kale naga caawiyay inaan ka shaqeyno (buugan)

- Xarunta Tallada ee Frauentreffpunkt
- Xarumahan magan-galka dumarka:
Frauen-Haus des Caritasverbandes – Xarunta magan-galka dumarka ee kooxda Caritas
Frauen-Haus Hestia- Xarunta magan-galka dumarka ee Hestia
- 2. Autonomes Frauen-Haus – Xarunta Magan-galka Dumarka Miyirka La'
- Mashruucyada guryaha hoyga laga dhigay:
Frauenort Augusta - Goobta magan-galka dumarka ee Augusta
Frauenzimmer – Qolka Dumarka Paula Panke
- Khadka 24-saac ee BIG iyo isu—duwayaasha BIG
- Booliska Berlin
- Netzwerk behinderter Frauen Berlin - Shabakada Dumarka Naafada ah ee Berlin
- maamulka golaha guurtida ee caafimaadka, daryeelka iyo sinaanta, gaar ahaan qeybta dumarka Khilaafka iyo Caqabadaha Nolosh

Sida loola xiriiri karo kooxda shaqeysa:



Cinwaanka:

Isu-duwida BIG
Durlacher Straße 11 a
10715 Berlin



iimayl:

mail@big-koordinierung.de



barta intarneetka:

www.big-koordinierung.de

Buugan waxa daabacay

BIG e.v.

Bei häuslicher Gewalt
Hilfe für Frauen und
ihre Kinder

BIG HOTLINE

BIG KOORDINIERUNG

BIG PRÄVENTION

Sawirada waxa sawiray Reinhild Kassing oo ka socda Kassel.
© Reinhild Kassing

Berliner Initiative gegen Gewalt an Frauen - Hindisaha
Berlin ee Ka Dhanka Xadgudubka Dumarka
BIG e.V.

Durlacher Str. 11 a • 10715 Berlin

Teleefon 030 61 70 91 00

Fakis 030 61 70 91 01

mail@big-koordination.de

www.big-koordination.de

iyo

Senatsverwaltung
für Gesundheit, Pflege
und Gleichstellung

be  Berlin

Maamulka Golaha Guurtida ee Caafimaadka, Daryeelka
iyo Sinaanta

Oranienstr. 106 • 10969 Berlin

Wixii su'aalo ah:

Susanna Thieme

Tel.: (030) 9028 – 2138

Fakis: (030) 9028 – 2066

I-meel: Susanna.Thieme@senaif.berlin.de

BIG KOORDINIERUNG

Bei häuslicher Gewalt · Hilfe für Frauen und ihre Kinder